




TILMAAMTA WAALIDKA EE QIIMEYNTA ARDAYGA



Waa maxay ujeedada qiimeynta MPS?

Qiimeynta waxay ka caawineysaa macalimiinta waxa ay ardayda garanayaan iyo waxa u baahan yihiin inay bartaan. Natiijooyinka imtixaanka, tijaabooyink, iyo qiimeynta kale waxay ka caawineysaa macalimiinta inay fahmaan sida loo saxo waxbarshada si loo daboolo baahida. Natiijooyinka sidoo kale waxay siiyaan dugsiyada macluumaad muhiim ah kuwaas oo loogu talagalay barnaamijyada waxbarshada si loo kor loogu qaado guusha.

La hadal waqti walba maclinka canugaaga haddii aad qabto su'aalo ku saabsan natijda imtixaanka iyo qiimeynta canugaaga.

Imisa saac ayey qaadansaa qiimeynta?

Macalimiinta waxay isticmaalaan imtixaano kala duwan si loo fahmo hormarka canugaaga. Muddada sanad dugsiyeedka, in ka yar 1.5% waqti ayaa lagu qaataa buuxinta heerka imtixaanka loo baahan yahay.

Waa maxay noocyada qiimeynta la isticmaalayo?

MPS waxay isticmaasha nidaamka qiimeyn oo isku dheelitiran si loo taageero waxbarashada ardayga, waxayna isticmaasha sadexda nooc ee qiimeynta.

- ▶ **Soo Koobida Qiimeynta** qiimeynta dhammaadka cutubka waxbarashada koorsada, ama sanad dugsiyeedka. Waxaa ka mid ah qiimeynta heerka gobol.
- ▶ **Qiimeynta Heerka** waxaa la isticmaala marmarka qaar sanad dugsiyeedka si loo socdo hormarka, ogeysiinta amarka, iyo aqoonsiga ardayda u baahaan taageerda dheeraadka ah.
- ▶ **Go'aanka Qiimeynta** waxay siisa macalimiinta jawaab celin degdeg ah oo ku saabsan sida wanaagsan ee ardayda ay u wax u baranayaan waxana loo isticmaala in lagu saxo waxbarashada, haddii loo baahdo.

Sideen ku taageeri karaa canugeyga inta lagu jiro imtixaanka?

Ku dhiirageli canugaaga marwalba inu dadaalo isaga ama iyada. Hubi canuga si waanagsan u nasto dugsigana ku yimaado waqtiga maalin walba. Xusuusi isaga ama iyada inay imtixanada yihiin qalabyo ka caawinaya macalimiinta inay ogaadaan waxa ay barayaan. Ardayda waxay isticmaali karaan natiijada imtixaanada si ay u fahmaan hormarkooda waxbarashada.

Waa maxay su'aalaha muhiimka ah ee ku saabsan qiimeynta ee la weydinayo macalinka?

Kala hadal wax ku saabsan qiimeynta macalinka canugaaga iyo imtixaanka qolka. Isaga ama iyada waxaad ka caawin kartaa waxa ay uga dhigtan micnaha natiijada ee canugaa iyo sida natiijada u saameyneyso waxbarashada.

- ▶ Imtixaannadee ayaa loo isticmaala heerka darajada cunugeyga iyo marka la qorsheynayo?
- ▶ Sidee ayaa natiijooyinka loo isticmaali doonaa si ay u saameyaan waxbarashada fasalka?
- ▶ Natiijooyinka imtixaanka ma saameyn doonaan buundooyinka canugeyga?
- ▶ Maxaa ka mid ikhtiyaarrada dugsigaa ama guriga haddii ay natiijooyinka ay soo jeedinayaan inuu canuga fahmin ujeedada ama waxaa laga yaabaa inuu ka faa'iideysano fursadaha?

Ujeedada qiimeynta ee MPS waa in la xoga si loo kobciyo macalimiinta iyo hogaamiyaasha dugsigga si kor loogu qaado waxbarashada iyo guusha ardayga.

Su'aalaha?

Wixii macluumaad ah oo ku sabsan qiimeynta gaarka ah, ilaha, iyo wixii caawinta fahamka natiijooyink imtixaanka canugaaga fadlan booqo:

- **MPS Assessment:** <http://mpsmke.com/assessment>
- **Waaxda Qiimeynra Waxbarshada Dadweynaha ee Wisconsin:** <https://dpi.wi.gov/assessment>

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan sida ay MPS u isticmaasho qiimeynta ardayga si loogu wargaliyo fasalka, dugsigga, iyo degmada, fadlan nala soo xiriiir.

Milwaukee Public Schools

5225 W. Vliet Street • Milwaukee, WI 53208 • (414) 475-8258
assessment@milwaukee.k12.wi.us • mpsmke.com/assessment

